

## *Dhibbanaasha dembiga waxa ay haystaan cid ay cawimaad weydiistaan*

Minnesota Crime Victims Reparations Board (magdhawga dhibbanaasha) waxa ay caawisaa dhibbanaasha iyo qoyskooda in xagga dhaqalaha wax kala qabato oo ka yimid falka dembiga culus ee soo gaaray.

Guddiga (The Board) waxa ay bixinayaan gargaarka dhaqalaha ee wax loogu qabanayo dhibbanaasha oo kharash jeebkooda kaga baxay qasaaraha ka soo gaaray falka dembiga lagu sameeyay.

## *Siday dhibbanaasha u dalbanayaan kabitaanka?*

Dhibbanaasha waxa ay codsan karaan foomka arjiga ayaga oo soo waca xafiiska magdawga dhibbanaasha (Victims Reparations). Foomanka arjiga waxa kale ee laga daabacan karaa internetkeena. Si lagaaga caawiyo buuxinta foomka arjiga, dhibbanaasha waa in ay la xiriiraan barnaamijka gargaarka dhibbanaasha ee deegaankooda.

Foomanka arjiyada la dhammeyay waa in boostada ama fakis loogu diro xafiiska magdhawga (Reparations). Dhibbanaasha waa in ay dalbadaan sida ugu dhaqsi badan. Hawlaha daawada caafimaadka iyo maxkamadda uma baahna in la dhammeyo kahor inta aan la xaraynin dacwadda magdhawga.

## *Yaa xaq u leh in uu dalbado?*

- Qofka ay soo gaartay qiiri shucuur ah iyo midda jirka ama geeri sababo dembiga la xiriira
- Qofka la dhaawacmay ama la dilay isaga oo iskudayaya in uu kahortago fal dembi, gacanta ku dhigo dembilaha, ama sarkaalka booliska caawiya
- Qofka kharashka adeegyada dhibbanaha ka bixiyay
- Xubnaha qoyska, ilmaha, ama kuwa masuulka ka ah dhaxalka dhibbanaha
- Masuulka, masuulka ay maxkamadda magacawday, qofka dhawra ama walkiilka sharciga u leh in uu eego arrimaha dadkan

## *Waa kuwee dembiyada laga hadlayo?*

- Dilka
- Weerar kadis ah
- Xadgudubka guriga ka dhaca
- Galmo xoog ah
- Xadgudubka caruurta (Jirka iyo Galmo xoog)
- Afduub
- Dhismo gubis
- Dhac
- Cagajugleyn/Gaadid
- Dembi culus ee ku dhufo ee ka carar
- Gariga la wado ayadoo la cabsanyahay
- Gaariga Falal Dembi Lagu Galo

Hantida burburtay ee aan caymis lahayn.

## *Wa maxay waxtarka la helayo?*

Waxa jira wax xadidan ee ku saabsan waxtakaan, iyo in waxtarka ugu badan uusan dhaafin 50,000 ee dhibanihiiba.

- Kharashka caafimaadka – isbitaalka, dhakhtarka, aambalaasta, maamulidda daawada, rijeetada, daryeelka daawaynta lafaha, alaadaha lagu socdo ee xibnaha badalay
- Kharashka latashiga ee dhibbanaha iyo xubnaha qoyskooda
- Kharashka duugta – adeegyada aaska, gubidda maydka, duugga, dhagaha barta ah, ubaxa, diwaangalinta geerida, hoteellada iyo safarka xubnaha qoyska ee duugga ka qaybgalay
- Mushaarka lumay sababo la xiriira itaaldarrida jirka ama dhaawaca niyadda
- Taagerayada aay caruurta waayeen (xaaska/sayga/rafiiga guriga iyo caruur yar) ee dhibbanaha la dilay
- Daryeelka caruurta iyo adeegyada xirfadaha guriga ee beddalaya adeegyada uu bixin jiray dhibbanaha wixii ka horreyay falka dembiga
- Kharashka gaadiidka, cuntada iyo jifka ee lagu soo celinayo cunug la qafaashay ransportation
- Nadifiska goobta falka dembiga uu ka dhacay

Xauunka iyo silica, iyo hantida burburtay ama la xaday ama hantida aysan caymis lahayn.

## Maxay yihiin shuruudaha xaq u helidda?

- Dembiga waa in uu yahay mid ka dhacay Minnesota, ama waddan ajnabi ah oo aan lahayn barnaamijka magdhawga
- Dhacdada dembiga uu ahaa mid boliiska lagu wargaliyay 30 cisho gudahooda (ma xaddidana waqtiga lagu soo sheegayo xadgudubka kufsashada iyo xadgudubka caruurta, laakiin dembiga waa booliska lala socodsiiyo)
- Dhibbanaha waa in SI BUUXDA uu garab ku siiyo baaritaanka ay boliiska wadaan iyo hay'adda magaalada ama xeerilaaliyaha si dembiilaha sharciga loo maariyo
- Foomanka arjiga waa in lagu xareeyo 3 sanadood gudahooda ee ka dambeeya waqtiga uu dambiga dhacay (dacwadaha xadgudubka caruurta waa in lagu soo gudbiyo 3 sanadood gudahooda ee waqtiga warbixinta dembiga boliiska loo gudbiyay)
- Waxaa shardi in dhibbanaha uusan asaga dembi galin ama xilkasnimadiisa ay sababtay iskahorimaadka
- Waa in marka hore la isticmaalo adeegyada ilaha curaarka ah oo dhan, ay kamid yihiin caymiska caafimaadka, Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka), caymiska gaariga, waqtiga fasaxa/ jirrada, itaaldarrida muddada gaaban iyo muddada dheer, waxtarka soshal sekuuritiga, iwm.

*OGAYSIIIS: WARBIKINTAN GAABAN WAXAA LOOGU TALAGALAY IN FIKRAD GUUD LAGAA SIIYO AKHBAARTA KU SAABSAN BARNAMIJKA MAGDHAWGA. KUMA JIRAAN WAXA SHARDIGA AH EE SHARCIGA MAGDHAWGA DHIBBANAYAASHA MINNESOTA (THE MINNESOTA CRIME VICTIMS REPARATIONS ACT).*

### NALAGA SOO XIRIIR

Office of Justice Programs  
Crime Victims Reparations Board  
445 Minnesota Street, Suite 2300  
St. Paul, MN 55101-1515

Email: [dps.justiceprograms@state.mn.us](mailto:dps.justiceprograms@state.mn.us)

Website: [www.ojp.state.mn.us](http://www.ojp.state.mn.us)

651-201-7300 Koobaad  
888-622-8799 Lacag la'aan  
651-205-4827 TTY  
651-296-5787 Fax

9/07

## GARGAARKA DHAQAALAHA EE DHIBBANAYAASHA FAL DAMBI EE CULUS

MINNESOTA CRIME  
VICTIMS REPARATION BOARD  
(GUDDIGA MAGDHAWGA  
DHIBBANAYAASHA MINNESOTA)



OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS  
(XFIISKA BARNAMIJYADA XAQSOORKA)  
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY  
(WAAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA)